

## HORUDHACA CEYMISKA SHAQO LA'AANTA

### Maxuu Yahay Ceymiska Shaqo La'aanta

Ceymiska shaqo la'aanta waa kaalmo ku meelgaar ah oo loogu talagalay dadka aan shaqeynin, laguna eedeeyn karin, inta ay ka raadsanayaan shaqo kale. Waa qeyb, muddo gaaban loogu baddalo mushaarka ka lumay, mana loogu talogelin in uu ahaado ilo laga qaato dakhli joogto ah. Manaafacaadka kuma saleysna baahida loo qabo dhaqaalaha. Manaafacaadka waxaa la siiyaa dadka soo dalbada ee xaqa u yeesha oo keliya lana kulma sharuudo gaar ah. Ujeedada ceymiska shaqo la'aanta waa in laguugu kaalmeeyo in dib lagu shaqaaleeyo sida ugu dhakhsiyaha badan.

### Xaq u Yeelashada

Loo shaqeeyayaasha waxay bixiyaan dhamaan kharashka ku baxa barnaamijka ceymiska shaqo la'aanta. Qiyaasta manaafacaadka laga yaabo in aad xaq u yeelatid in aad qaadatid waxaa xisaaba qiyaasta shaqada aad qabatay iyo mushaarka aad shaqeystay muddada 18da bilood ka hor inta aadan soo gudbinin sheegashada<sup>1</sup>.

### Sida Loo Dalbado Ceymiska Shaqo La'aanta

Talaabada kowaad ee lagu qaato manaafacaadka waa in la soo gudbiyo sheegasho hore. Haddii ay kuu fududahay akhriska luqadda Ingiriisiga, waxaad sheegashada ka gudbin kartaa internetka [jobs.utah.gov](http://jobs.utah.gov). Haddii kale, waxaad Claims Center (Xarunta Sheegashada) ka wacdaa mid ka mid ah namburada ku qoran liiska hoose si aad ula hadashid qabtaha sheegashada oo kugu kaalmeyn kara luqadda aad jeceshahay.

### Waxyaabaha Loo Baahan Yahay Si Loo Dalbado Ceymiska Shaqo La'aanta

Si aad u soo dalbatid, waxaad u baahan tahay in aad ogaatid nambarkaada Soshal Sekuriti, Shattiga Wadaha (Driver's License) ama nambarka aqoonsiga gobolka soo saaray, iyo magacyada iyo taariikhyada dhamaan meelaha aad ka soo shaqeysay 18dii bilood ee la soo dhaafay. Sheegashada waxaa laga bilaabi doonaa todobaadka la dhamaystiro arjiga hore, sidaas darteed waxaa muhiim kuu ah in aad furtid sheegashadaada todobaadka kowaad oo aad dibadda ka tahay shaqada.

### Sida Aad u Qaadatid Lacagaha Ceymiska Shaqo La'aanta

#### 1. DOORO HAB LAGUUGU SIIYO LACAGTA

Inta uu socdo arjigaada hore, waxaad dooran kartaa in lagu siiyo lacag adiga uu samaysta habka lacagta sida tooska loogu shubo xisaabtaada bankiga ama adiga oo doorta in aad qaadatid US Bank Reliacard.

#### 2. 2GUSBINTA SHEEGASHADA TODOBAADKA

Kaddib marka aad dhameysid arjiga hore, waxaa lagaa dalban doonaa in aad soo gudbisid sheegashada todobaadka si sheegashadaada u sii socoto iyo si aad u qaadatid lacagta. Todobaad kasta, waxaad caddeyn doontaa in aad xaq u leedahay manaafacaadka adiga oo soo sheega waxa aad qabatay dib-u-shaqaaleyntaada laga soo bilaabo muddada Axaddii la soo dhaafay ilaa Sabtida. Habka sheegashada todobaadka wuxuu ka kooban yahay ka jawaabidda dhowr su'aal fudud. Haddii ay kuu roon tahay in aad ku akhrisid luqadda Ingiriisiga, waxaad adeegsan kartaa internetka [jobs.utah.gov](http://jobs.utah.gov) si aad u soo gudbisid sheegashadaada todobaadka. Haddii kale, waxaad Claims Center ka wacdaa mid ka mid ah namburada hoos ku qoran.

Waxaa dhici karto in aad la kullantid arrimo u baahan in Waaxda Adeegyada Xoogga Shaqada (Department of Workforce Services) baarto ka hor inta aan lagu arkin in aad xaq u leedahay manaafacaadka. Waxay qaadan kartaa ilaa afar todobaad si aad u heshid go'aan ku saabsan xaq u yeelashadaada. Waqtigaan, waa in aad sii waddid gudbinta sheegashadaada todobaadka. Haddii aadan sidaas yeelin, laguma siin doono lacag todobaadyadaas xattaa haddii goor dambe la ogaado in aad xaq u layd manaafacaadka.

#### 3. ISKA DIIWAAN GELI DEPARTMENT OF WORKFORCE SERVICES SI AAD U HESHID SHAQO

Muddada 10ka maalin hore gudahooda laga bilaabo arjigaada hore, waa in aad iska diiwaan gelisid Department of Workforce Services. Haddii uu kuu roon yahay akhriska luqadda Ingiriisiga, waxaad ka akhrisan kartaa [jobs.utah.gov](http://jobs.utah.gov). Haddii kale, waxaan kugu kaalmeyn karnaa luqadda aad jeceshahay marka aad soo booqatid mid ka mid ah Employment Centers (Xarumaha Shaqada) hoos ku qoran.

<sup>1</sup> Si aad u heshid liis dhamaystiran oo ku saabsan sharuudaha xaq u yeelashada, tixraac Hoggaamiyaha Sheegtaha ee laga helo <http://jobs.utah.gov/ui/jobseeker/claimguide.html> ama la xariir Claims Center si aad heshid kaalmo laguugu siiyo luqadda aad jeceshahay.

**INTRODUCTION TO UNEMPLOYMENT INSURANCE • PAGE 2**

**4. KU DADAAL RAADINTA SHAQADA**

Qeyb muhiim ah oo la xariirta dib-u-shaqaaaleynta waxay tahay sida firfircoon ee loo raadsado shaqada. Sida qeyb ka tirsan sheegashadaada todobaadka, waxaa lagu weydiin doonaa in aad soo sheegtid tafaasiisha afar shaqooyinka waqtiga buuxa aad la xariirtay. Macnaha xariirka cusub waa in lala xariiro loo-shaqeeye aadan horay ula xariirin, ama in aad la xariirtay loo-shaqeeye aad horay ula xariirtay adiga oo kala xariira shaqo cusub, banaan, oo la soo dhajiyay. Haayso diiwaan tafatiran oo ku saabsan hawlahaada raadinta shaqada:

- Taariikhda aad la xariirtay
- Magaca shirkadda iyo nambarka dhajinta shaqada
- Cinwaanka shaqada, nambarka telefoonka, email, xariirka internetka ama qofka lala xariiray
- Mansabka Booska
- Habka aad ula xariirtay
- Natijada

**5. SOO SHEEG SHAQO KASTA AAD QABATAY**

Dadka qaar waxay u arkaan in ay waxtar leedahay in la shaqeeyo qeyb ka mid ah waqtiga ama in ay ka shaqeyaan shaqo ku meel gaar ah inta ay ku hawlan yahiin raadinta shaqada waqtiga buuxa. Tani waxay kugu kaalmeynaa in aad xajisid xirfadahaada, adiga oo isla markaasna xaq u yeesha qeyb ka mid ah lacagta manaafacaadka. Marka aad soo gudbineysid sheegashadaada todobaadka, soo sheeg dakhliga guud ee kaa soo gala shaqo kasta aad qabatay todobaadkaas. Dakhliga guud waa xisaabta lagu siiyo ka hor inta aan lagaa goynin canshuurta iyo dhimista kale (sida masaruufka cunugga).

Tusaale ahaan, haddii aad shaqeysid qeyb waqtiga ama aad haysid shaqo ku meel gaar ah, waa in aad soo sheegtid dakhliga guud ee ku soo gallay todobaadka aad qabatay shaqada, iyadoo aan la fiirin goorta lagu siiyay lacagta. Ka dhig in aad heshay shaqada la shaqeeyo qeyb waqtiga adiga oo isla markaasna soo dalbada manaafacaadka shaqo la'aanta iyo in shaqadaada cusub ku siiso \$10/saacaddii. Maalinta kowaad aad ku sugneyd shaqada waxay ahayd Arbaco. Waxaad shaqaysay 6 saac maalinta Arbacada, 7 saac maalinta Qamiista iyo 5 saac maalinta Jimcaha. Marka aad soo gudbineysid macluumaadka sheegashadaada todobaadka, waxaad u baahan tahay in aad soo sheegtid 18 saac aad ku shaqaysay \$10/halkii saac = \$180 dakhliga guud ee ku soo gallay xattaa haddii aan weli lagu siinin mushaar.

**6. NALA SOO XARIIR HADDII AAD QABTID SU'AALO**

Department of Workforce Services waxay fullisaa xisaab xer joogto ah oo ku saabsan sheegasho kasta si loo xaqiijiyo xaq u yeelashada. In aan la soo sheegin macluumaad sax ah, sida macluumaadka la xariira shaqadaada iyo lacagaha aad shaqeyatay iyo dadaalka raadinta shaqada, waxay ahaan kartaa khayaano. Haddii la ogaado in ay jirto khayaano, waxaa loo baahan yahay in aad soo celisid labo laab manaafacaadka aad qaadatay, in lagaa joojiyo in aad mustaqbalka qaadatid manaafacaad iyo sida suurtoogalka ah taasi waxay dhallin kartaa in laguugu soo oogo dambi. Qof kasta oo qaata manaafacaad, wuxuu sharci ahaan mas'uul ka yahay in uu hubsado in uu la kulmo iyo in uu raaco sharuudaha xaq u yeelashada. Si taxadir leh u akhri dhamaan macluumaadka lagu soo diray, kaddibna haddii aad ka qabtid su'aalo, wac Claims Center (Xarunta Sheegashada).

**Sida Aad Noola Soo Xariirtid**

Wac Claims Center, adiga oo ka waca mid ka mid ah namborada hoos ku qoran. Dooro fursadda 1, riix #, kaddibna riix 5 si aad ula hadashid wakil ku hadla luqadda aad jeceshahay.

- Dagmooyinka Salt Lake iyo South Davis .....801-526-4400
- Dagmooyinka Weber iyo North Davis .....801-612-0877
- Dagmada Utah .....801-375-4067
- Baaqiga Gobolka ama Dibada Gobolka.....1-888-848-0688

**Si aad isu gelisid diiwaanka shaqada, booqo mid ka mid ah Employment Centers, cinwaanka wuxuu ku qoran yahay hoos**

Beaver 875 North Main Beaver, UT 84713	Junction 550 North Main Junction City, UT 84740	Moab 457 Kane Creek Blvd Moab, UT 84532	Roosevelt 140 West 425 South, 300-13 Roosevelt, UT 84066
Blanding 544 North 100 East Blanding, UT 84511	Kanab 468 East 300 South Kanab, UT 84741	Nephi 625 North Main Street Nephi UT 84648	South County 5735 South Redwood Road Taylorsville, UT 84123
Brigham City 138 West 990 South Brigham City, UT 84302	Lehi 557 West State Street Lehi, UT 84043	Ogden 480 27th Street Ogden, UT 84401	South Davis 763 West 700 South Woods Cross, UT 84087
Cedar City 176 East 200 North Cedar City, UT 84721	Loa 18 South Main Loa, UT 84747	Panguitch 665 North Main Panguitch, UT 84759	Spanish Fork 1185 North Canyon Creek Parkway Spanish Fork, UT 84660
Clearfield 1290 East 1450 South Clearfield, UT 84015	Logan 180 North 100 West Logan, UT 84321	Park City 1910 Prospector Ave. #100 Park City, UT 84060	St. George 162 North 400 East, Suite B100 St. George, UT 84770
Delta 44 South 350 East Delta, UT 84624	Manti 55 South Main, Suite 3 Manti, UT 84642	Price 475 West Price River Drive #300 Price, UT 84501	Tooele 305 North Main Street, Suite 100 Tooele, UT 84074
Emery 550 West Highway 29 Castle Dale, UT 84513	Metro 720 South 200 East Salt Lake City, UT 84111	Provo 1550 North Freedom Blvd (200 West) Provo, UT 84604	Vernal 1050 Market Drive Vernal UT 84078
Heber 69 North 600 West, Suite C Heber, UT 84032	Midvale 7292 South State Street Midvale, UT 84047	Richfield 115 East 100 South Richfield, UT 84701	